



Dhageysiga Dacwadaha Qoyska ee degmada King Dhageysiga Aan Rasmiga Aheyn Iyo Habkii Hore



Doorashada Nooca Dhageysiga

Dacwadaha Qoyska laba hab ayaa loo dhageystaa: dhageysi aan rasmi aheyn iyo mid habkii hore ah. Waxaa jira farqi muhim ah oo u dhaxeeya labada dhageysi. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan akhri [Dhageysiga Dacwadaha Qoyska \(Family Law Trials.\)](#) Waxaa kale oo aad akhrin kartaa [LFLR 23](#).

Waa in aad go'aan ka gaartaa nooca dhageysiga ee aad dooneyso, ka dibna aad wargelisaa maxkamadda go'aankaaga adiga oo ka diiwaangelinaya Xafiiska Xogheynta. Halkan kala soo bax [Foomka Doorashada Dacwadaha Qoyska \(Family Law Trial Selection form.\)](#)

Haddii ay ilmo qeyb ka yihiin dacwadda, waa in aad soo gudbisaa foomka ka hor ama dhegeysiga ka horeeya kan ugu dambeeya ee dacwadda.

Haddii aysan ilmo yar qeyb ka aheyn dacwadaada, waa in aad Si Wadajir Ugu Cadeysaan go'aanka aad gaartaan ee foomka U Diyaargaroowga Dhageysiga.

Dhageysi aan Rasmiga aheyn waxaa la qabanayaa oo kaliya haddii ay labada dhinac isku raacaan dhageysi aan rasmi aheyn.



U Diyaargaroowga Dhageysiga

Waa in wixii qoraal ah soo gudbisaan dhageysiga ka hor. Waxyaabaha lagaa doonayo in aad sameyso waxa ay ku xiran tahay nooca dhageysiga aad doorato iyo shuruudaha ku xusan amarka ka soo baxa dhageysiga ka horeeya kan ugu dambeeya (haddii uu jiro).

- **Dhageysiga Habkii Hore:** Macluumaadka ku saabsan [halkan ayaad ka heleysaan sida la isugu diyaariyo](#).
- **Dhageysiga Aan Rasmiga Aheyn:** Akhri amarka maxkamadda ee dhageysiga ka horeeya kan ugu dambeeya ee dacwadda iyo [LFLR 23](#) si aad u ogaato waxyaabaha lagaa doonayo in aad u soo gudbiso maxkamadda dhageysiga aan rasmiga aheyn ka hor.

Haddii aad is mataleyso, waxaa laga yaabaa in lagaa caawiyo u diyaargaroowga dhageysiga. Akhri <https://www.kingcounty.gov/courts/superior-court/family/facilitator.aspx> si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loola xiriiro shaqaalah dadka caawiya.



Dhageysi in la idiin qabto looma baahna haddii aad labadiinu heshiis gaartaan!

Haddii aad is mataleyso, soo booqo <https://www.kingcounty.gov/courts/superior-court/family/facilitator.aspx> si aad u hesho macluumaad dheeraad sida dacwadda heshiis looga gaaro dhageysiga ka hor.